

Mulkiilaha Hantida ee Qaaliga ahow,

## **Waxaa la gaaray waqtigii aad dib u cusboonaysiin lahayd Diiwangelinta(ada) Kirayntaada!**

[Waxaad halkan si onlayn ah dib uga cusboonaysiin kartaa diiwaangelintaada.](#)

**Lambarkaaga Kirada & Magacaaga Isticmaalaha:** [Shatiga]

**Ma xasuusatiid miyaa lambar sireedkaaga?** [Dib uga dejiso halkan.](#)

**Sidee ayaan u cusbooneysiisaa diiwaangelintayda?**

**Lambarkaaga Kirada & Magacaaga Isticmaalaha:** [Shatiga]

- Ka gal koontadaada [halkan](#)
- Dooro “Tafatir, Dib-u-cusbooneysi, ama Xir Diiwaangelin Horay u Jirtay”
- Dooro “Raadi”
- Dooro “Dib-u-cusbooneysi” si aad isbeddel ugu sameyso diiwaangelintaada.
- Dooro “Khidmadaha” si aad lacag ugu bixiso guryaha la xushay

Qaado daqiiqad si aad u gujiso Wax-ka-beddel Koontada ee ku taalo dhinaca bidix ee shaashadda si aad u hubiso in macluumaadkaaga xiriirka uu sax yahay. Waxaad heli doontaa iimayl kuu xaqiijinaayo in dib-u-cusbooneysiintaadu dhammaatay.

**Hannaanka dib u cusboonaysiinta waxay dhammaystiraa oo kaliya marka xaalada hantidu tahay “dib loo cusboonaysiiyey.”**

[Halkan guji si lagaaga caawiyo dhammaystirka hannaankan!](#)

[Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo](#)

**Waa maxay sababta laguugu soo diray iimaylkan?**

Haddii aad kiraysato guryaha ku yaalo gudaha Magaalada Boston, waxaa lagaaga baahan yahay inaad guri kasta ka diiwaangeliso Qaybta Guriyeynta ee Waaxda Adeegyada Kormeerka. Guriga(guryaha) way diiwaangashan yihiin, laakiin dhammaan diiwaangelinnada waa in dib loo cusboonaysiiyaa sanadkiiba mar. Diiwaangelintaada(adaada) waxay hadda sugaysaa dib u cusboonaysiin oo khidmadaha ayaa dhaafay waqtigii loogu talagalay.

Haddii aad ku guuldaraysato dib u cusboonaysiinta diiwaangelintaada waxay kuu sababi doontaa ganaaxyo. Dhammaan lacag-bixinada waxaa lagu bixin karaa si onlayn ah iyadoo la isticmaalayo koonto bangi ama kaarka bangiga. Fadlan ogow in lacag-bixinta onlaynku ay qasab tahay wixii diiwaangelinta 10 guri ama ka badan ah.

**Xasuusnow: Ha samaysan koonto cusub haddii aad mid horay u lahayd.** Ma awoodi doontid inaad dib u cusboonaysiiso guryaha hadda jira ilaa aad galaangal uga hesho koontada horay loo diiwaangeliyay, dhammaan guryaha aad leedahay ama aad maamushana waa inay ku hoos jiraan hal koonto. Waa inaad si gaar ah u dhammaystirtaa hannaanka dib-u-cusboonaysiinta ee hanti kasta oo diiwaangashan. Fadlan xasuusnow inaad hubiso faahfaahinnada diiwaangelinta oo aad cusboonaysiiso wixii macluumaad ah ee isbedelay tan iyo dib u cusboonaysiintaadii ugu dambaysay.



Haddii aad qabtid wax su'aalo ah, noogu soo dir iimaylka [rentalprogram@boston.gov](mailto:rentalprogram@boston.gov) ama soo wac 617-635-5300.